## Hawsha:

**Hawsha Dugsiga Emerson waa in uu bixiyo waxbarasho horumar ahaan ku habboon, macno leh isla markaana loolan adag leh oo loogu talagalay koox kala duwan oo carruur ah kaasi oo ah jawi aqoonsanaya, qiimeynaya, isla markaana jawaab ka bixinaya awoodahooda iyo baahiyahooda shakhsi. Waxaanu dhiirigelinaa wax bartayaal ah naxariis leh, awood leh, isla markaana muddo dheer wax baranaya oo naftooda u arka in ay yihiin xubno ku lug yeelanaya bulshadooda kuwaasi ay ficiladoodu ay isbeddel wanaagsan keeni karaan.**

**Guddiga iyo shaqaala Dugsiga Emerson waa kuwo matala koox dadka ah oo kala duwan oo leh ballanqaad guud oo la xiriira u sinnaanshaha fursadda loogu talagalay dadka oo dhan. Dugsiga Emerson waa urur mid bixiya fursado laga wada siman yahay oo aanan qofna takoorayn iyadoo ay la xiriirto asalka, qowmiyadda, jinsiyada, dookha galmo, da'da, diinta, xaalada guur, dalka laga soo jeedo, ama naafanimada maskaxeed ama jireed.**



**The Emerson School**
**1800 SW 1st Avenue Suite #1**
**Portland, OR 97201**
**Telefoonka: 503-525-6124**
**Fax-ka: 503-223-4875**
**E-mail-ka: info@emersonschool.org**

# Ku soo dhowow Dugsiga Emerson

The Emerson School



**The Emerson School**
**1800 SW 1st Avenue Suite #1**
**Portland, OR 97201**
**503-525-6124**
**info@emersonschool.org**
**www.emersonschool.org**



# XAQIIQOOYIN DEGDEGA AH:

- Waxaa la furay 2003
- Wuxuu u adeegayaa fasallada K-5
- Waa jawi dugsi oo yar
- Heerarka fasallada oo la isku dhex daray
- Waa manhaj ku saleysan mashruuc
- Adeeg waxbarasho
- Waxbarasho bulsho-dareen ahaaneed oo ku saleysan Anshax marin oo Wanaagsan

Ma daneynaysaa in aad isqorto? Fadlan wac 503-525-6124 wixii macluumaad ah.

## Habka Waxbarashada

Habka Mashruuca wuxuu tixraacayaa kooxo istiraatijiyad wax bari oo taas oo macallimiintu awood u siisa in ay carruurta ay wax u tilmaamaan carruurta iyada oo la adeegysanayo daraasado qoto dheer oo la xiriira mawduucyo dhabta ah.

Mashruuca waxaa la qeexay in uu yahay baaritaan qoto dheer oo la xiriira mawduucyo dhabta ah uu qalanta dareenka iyo dadaalka carruurta. Habka Mashruuca waxaa si cad loogu qorsheeyay, sahaminta sayniska oo saddex waji leh oo ah mawduuca la xiiseynayo. Waxaa jira nidaam adag laakiin dabacsan oo leh sifooyin tilmaamaya ixdhexgalka wax barida-waxbarashada. Marka ay macallimiintu si guul leh u hirgeliyaan Habka Mashruuca, carruurtu aad ayay u dhiiradaan, waxay dareemaan in ay si firfircoon uga lug yeeshaan waxbarashadooda, waxayna soo saaraan shaqo tayo sare leh.

Shaqada mashruucu waxay carruurta siisaa fursaddo ay si toos ah ugu sameeyaan cilmi-baarista sayniska iyo cilmiga bulshada isla markaana ay u soo bandhigaan siyaabo kala duwan. Carruurtu waxay sidoo kale haystaan waqtiyo badan oo ah inta lagu jiro mashruucooda si ay u bartaan una adeegsadaan xirfadaha xisaabta iyo akhriska/qoraalka iyo aqoonta. Sharaxaadda mashruucu waxay noqon kartaa sheeko wanaagsan oo leh bilow, meel dhexe, iyo dhammaad. Macallimiinta iyo carruurtu waxay sheegi karaan sheeko iyaga oo tixraacaya saddexdan waji ee nolosha mashruuc.

Wixii macluumaad ah ee dheeraad ah fiiri see http://www.projectapproach.org

**Waa maxay dugsiga madaxa bannaani?**
Dugsiyada madaxa bannaan waa dugsiyo dadweyne oo loogu talagay in ay bixiyaan barnaamijyo casri oo leh falsafado waxbarasho oo gaar ah iyo/ama bixinta tusaalooyin laga helayo fursado dheeraad ah oo loogu talagalay ardayda iyo qoysaska ka tirsan nidaamka dugsiga dadweynaha. Dugsiyada madaxa bannaani waa urur ah 501(c)3 oo qandaraas la gala Dugsiyada Dadweynaha Portland si ay u damaanad qaadaan isla markaana u dhowraan madax bannaani heerkoodu sareeyo taasi oo lagu beddelanayo isla xisaabtanka la kordhiyay. Dugsiga madax bannaan waxaa lagu maamulaa Xeerka La Casriyeeyay ee Oregon (ORS) 338.

**Waa maxay xiriirka ka dhexeeya dugsiyada madaxa bannaan iyo PSS?**
PPS ayaa ka mas'uul ah kor kala socoshada iyo kormeerka dhammaan dugsiyada madaxa bannaan ee ay damaanad qaaday degmadu. PPS waxay ururisaa waxyaabaha sanadlaha ah ee la iskaga baahan yahay in la bixiyo, waxay la socotaa xasiloonida maaliyadeed iyo waxqabadka ardayga, waxayna hubisaa in dugsiga madaxa bannaani uu u hoggaansan yahay sharciga iyo heshiiska.

**Sidee ayuu ardaygu isku qoraa dugsiga madaxa bannaan?**
Isqorista dugsiga madaxa bannaan waa in ay ahaataa mid caddaalad ah isla markaana loo siman yahay, waxaana laga yaabaa in ay ku kooban tahay da'da ardayga, heerka fasal ee ardayga, iyo booska bannaan ee jira. Haddii dugsiga madaxa bannaani uu helo codsiyo ka badan booska bannaan ee jira marka la eego heerka fasalka/fasalka la joogo, markaasi waa in loo sameeyaa bakhtiyaanasiib loo siman yahay si loo go'aamiyo isqorista heerka fasalka/fasalka la joogo.

***"Sharafta ugu weyn ee noloshu ma aha mid aah in ayaan dhicin, ee waa in aan kacno mar kasta oo aan dhacno."***

**Ralph Waldo Emerson**

